FALSAFADDA KANEECADA

W/Q:Cabdullaahi M. Cawsey

Quruxda nolosha waxay ku jirtaa u kuurgalida iyo barashada qaababka kala duwan ee nafleyda kale ee dunida ku nool u dabaraan noloshooda gaarka ah Sidoo kale foolxumada nolosha waxay muuqataa marka laga waji dadbado ama la iska indho-tiro qaabka nolosha dabiiciga ah ku socoto dabadeedna la isku maaweeliyo sheeko baraley aan bar iyo raad midna ku lahayn hanaan socodka dhabta ah ee nolosha. Haddaba qoraalkan kooban wuxuu ku saabsanyahay falsafadda Kaneecada ay ku maareyso nolosheeda gaarka ah. Ogaanshaha falsafadda Kaneecada waxay dan guud ugu jirtaa dadka oo Kaneecada la wadaaga orodka iyo harjadka aan dhamaadka lahayn ee nolosha loogu jiro. Sidoo kale, barashada falsafadda Kaneecada waxay si gaar ah uga faa'idi kara dadka Soomaaliyeed oo waqtigan la joogo danbe si dirqi ah ugu nool geeska Afrika iyo dacallada aduunka .

Aqoonyahanka noolebaaraha ahi "biologists" waxay ogaadeen xaqiiqo yaab leh oo ku saabsan qaab- taranka guud ee Kaneecada. Waxay cilmi baaris ku ogaadeen in Kaneecada ku baraarugsantahay run aysan ka dhuuman karin si kasta oo ay u cibaadaysato ama u calaacasho. Runtan waa mid ku aadan xiriirka ka dhaxeeya Kaneecada iyo deegaanka dabiiciga ah " Environment." Kaneecadu waxay garatay in dhasha iyo ubadka kaneecada lagu xukumay dhimasho deg deg ah mar ala marka ay ku dhex dhashaan deegaanka dabiici ah. Nasiib darro, markay qarxaan ukumaha Kaneecada, waxa isla goobtii ku qurbaxa oo ku saqiira caruurtii Kaneecada ee mudada dhow ama dheer laga war dhowrayay. Arintan waxay horseeday in faylasuufyada Kaneecada hal-abuuraan falsafad lagu badbaadin karo sinjiga Kaneeca iyo dhasheeda ay u heeshiiyeen maqaadiirta iyo odaygii malakulmowt ahaa.

Falsafadda Kaneecada waxay ku baaqaysaa in Kaneeco walba kun ukumood ku dhex daadiso deegaanka dabiiciga ah. Sirta ka danbeysa go'aankan fasafadeysan ma ahan mid la iska malawaalay, ee waa falsafad muddo badan laga baaraan dagay ka dib markii kaneecada ku baraarugtay in kunkii ukumood oo kaneeco ah mid ka mid ah si dirqi ah ku badbaadi doono, halka sagaal boqol, sagaashan iyo sagaalka ukumood oo kale ay ku dhex saqiiri doonaan deegaanka dabiiciga ah. Waa go'aan murugo iyo shaqo badan laga mudan doono, balse waddo kale oo Kaneecada u bannaan ma jirin waa haddii ay doonayso in faraceeda waaro, waayo nolosha oo dhan

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

waxay ka bilaabataa kuna dhamaataa go'aan uu rabbi gaaray oo ah waari-mayside war hakaa haro!

Dadku waa noole sida Kaneecada oo kale dhibaatooyin badan kala kulma qaabkii la isku qabadsiin lahaa itaaldarida ka muuqata iyo dhibaatooyinka ama dheefta ku lamaansan deegaanka dabiiciga ah " environment." Si la mid ah sida noolaha kale ugu dadaalayaan in halganka nolosha aan laga harin, dadka waxaa ku waajibay dadaal dheeraad ah oo lagu baranayo deegaanka dabiiciga ah si looga faa'idaysto wixii dheef noqon kara , loogana gaashaanto wixii dhibaatooyin ah oo halis ku noqon kara hab socodka nolosha guud ee dadka. Nasiib wanaag, bani'aadamka badankiis wuxuu ku baraarugsan yahay awood yarida ka muuqata abuur ahaan marka la barbadhigo xooga ka muuqda habar dugaaga ku wehliya deegaanka dabiiciga ah.

Baraarugan ka hor, nolosha dadku waxay ahayd mid barako badan aan lahayn. waayo sida taariikhda ku xusan dadku waxay halis u ahaayen in quraac ama qado u noqdaan habar dugaag haybad gaar ah ku dhex leh deegaanka dabiiciga ah. Sida Kaneecada oo kale, deegaanka dabiici ah ah dadku waxay ka muteen dhibaatooyin badan oo malaayiin sano isbaaro u dhigtay in bani'aadamka gaaro nolol baraare iyo barwaaqo leh.

Qax iyo qaxar badan ka dib, quruumihii hore waxay hoosta ka xariiqeen go'aan ah in deegaanka dabiiciga ah " natural environment" laga dhex baxo si loo sameysto deegaan aan dabiici ahayn oo ah dhaqan "culture" kaas oo bani'aadamka u saamaxaya nolol ku salaysan deganaan "stability " si loo gaaro danta nololeed ee dadka oo ah badbaadinta dhashooda iyo socodsiinta sinjiga dadka si aan looga go'in silsilida nolosha ee isku xirta naflayda oo idil. Go'aankan kama duwana go'aanka falsafadaysan ee Kaneecada gaartay sida kor ku xusan.

Deegaanka aan dabiiciga ahayn " dhaqan" ee qolo kasta si gaar ah u samaysatay waxaa kor looga xeendaabay ilbaxnimo guud oo aadanaha oo dhan ka dugsado dhibaatooyinka kaga imaankara deegaanka dabiiciga ah " environment" Qoraal sidan u kooban loogama bogan karo qeexitaanka dhaqan " culture" oo ka dhigan tiir dhexaadka ay ku taagantahay dhismaha guud ee ilbaxnimada dadka.

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

Haddii si guud la iskugu dayo tilmaanta waxa dhaqan yahay waxaa lagu soo koobi karaa : Aragtiyooyinka nolosha lagu maareeyo “ ideas” waxyaabaha sida gaarka ah loo qiimeeyo “ values”, caadooyinka soo jireenka ah “ norms”,hadalka dadku ku xariiraan si ay u wadaagaan aragtida nolosha iyo waxyaabaha qiimaha leh “Language”, qaababka loogu dhawaado awoodaha dhuumaalaysta “ spirituality” Hanaanka la isku qabadsiiyo awoodaha dhuumaalaysta iyo nolosha dabiicga ah “ religion” Qalabka loo aadeegsado furdaaminta nolosha “ technology” dhismaha magaalooyinka lagu noolyahay” Cities” Hay’adaha bulsho “ Social institutions” ee qofka u diyaariya ama ka caawiya nolosha sida qoyska, goobaha waxbarashada, dawladda iyo waliba goobaha lagu cibaadaysto iyo xasuusashada iyo keydinta wixii dhacay “ History”.

Mar haddii dhaqanku ka dhiganyahay dhamaan deegaanka aan dabiici ahayn ee dadku u baahanyahay in ay kaga badbaadaan waxyeellada deegaanka dabiiciga ah, waxaa qasab ah in dadka ku baraarugaan sirta lagu dhisi karo dhaqan, dabadeedna lagu dhaqaajin karo deegaan aan dabiici ahayn oo dadku iska dhaxlaan. Sirtan kama duwana nuxur ahaan sirta ay ku baraarugeen faylasuufyada Kaneecada si sinjiga kaneecada looga badbaadiyo dabar-go iyo waliba darxumada ay kala kulmeen deegaanka dabiiciga ah. Faylasuufyada dadka waxay muddo badan ku doodayeen in kunkii aragti “ ideas” ee ka soo maaxda maanka dadka in mid ama labo maangal ka yihiin, halka inta soo hartay ka noqdaan mala-waal iyo maaweelo muujinaya ama ka maragkacaya doqonniimada iyo aragti gaabnimada dadka.

Dhaqan oo dhan waxaa waxaa saldhig u ah aragtiyooyin cusub “ new ideas” oo marwalba la curiyo. Wareer iyo welwel hor leh ayaa dadku dareemi karaan mar haddii dhaqan- (deegaanka aan dabiiciga ahayn) ee nolosha dadka aan looga maarmin uu magan u yahay aragti cusub oo la curiyo marwalba. Dhanka kale sida ay faylasuufyadu ku doodayaan kunkii aragti mid ama labo ayaa runta iyo danta dadka u dhow! Haddaba muxuu xalku noqonayaa? Falaasifadu waxay ku taliyeen in la qaato Falsafadda kaneecada oo kale. Mar haddii kunkii aragti ee dadku maankooda ka malawaalaan mid ama labo runta nolosha iyo danta dadka u dhowyihiin, waa in qanaaco iyo iimaan la mid ah midka Kaneecada oo kale la muujiyo marka ay qurbaxaan ama saqiiraan aragtiyooyin badan oo ka dhigan dhashii dadka.

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

Aqristaha qiimaha badan wuxuu is weydiin karaa sidee dadku u kala ogaan karaan aragtida saqiirtay iyo mida qaangaarka noqotay mar haddii qolo kasta dhaqankeeda ku soo bandhigto kun aragti oo is barbaryaacaya?

Jawaabta oo fudud waxaa laga heli karaa Falsafadda Kaneecada. Tusaale ahaan, Kaneecadu waxay horay u ogtahay in kunkii Kaneeco mid kaliya badbaadi doono.Haddaba Kaneecadu waxay xoog iyo xeelad iskugu gaysaa fursad ay ku soo saari karto ukunta kaliya ee ka badbaadi doonta xasuuqa deegaanka dabiiciga ah ku sugaya ukumaheeda kunka gaaraya. Sidaa daraadeed, Kaneecadu waxay dareentaa guul iyo gobannimo haddii sagaal boqol, sagaashan iyo sagaal ukumood saqiiraan oo mid kaliya ah u badbaado. Sidaas oo kale, dadku waa in horay u sii ogaadaan in kunkii aragti ee ay malwaalaan in mid ama labo maangal kayihiin. Sida kaliya ay ku ogaan karaan aragtida qaan gaarka noqon karta ayaa ah in tijaabo joogto ah oo cuskan farsamo cilmayaysan " science" in aragti kasta lagu shiilo ka hor inta aragtidaas aysan caamada calman ama caleemo saaranin.!

Faylasuufkii weynaa mudane Alfred North Whitehead (1861–1947) ayaa ku dooday sirta ka danbeysa in dadku nolosha ku bullaalaan in ay tahay ogolaanshaha ku aaddan dhimashada aragtiyooyin badan oo dadku malawaaleen. Sidoo kale wuxuu ku dooday in saldhiga burburka iyo barakaca nolosha dadka in ay tahay diidmo " denial" ku aaddan geerida dabiiciga ah ee ku timaada aragtiyooyin badan oo dadku muddo isku maaweelinayeen. Xikmadda ku jirta dooddda odaygan ayaa ah in qof walba, iyo qolo kasta u diyaar garoobaan in ay xabaalaan aragtiyooyin badan oo ku dhex saqiiray dhaqanka –deegaanka aan dabiiciga ahayn- si horay loogu sii dhaqaajiyo nolosha. Haddii xikmaddan la dhayal sado oo aragti dhimatay la iskaga rarnaado waxaa dhacaya in dhaqanku dhagaxoobo, dabadeedna dadka iyo dugaaga markale isku waraystaan deegaanka dabiicigi ah " natural environment" ee waa hore laga soo tahriibay!

Aqristaha qiimaha badan waxaa laga yaaba inuu ku daalay sharaxaadda dheer ee aan ka bixinay xiriirka ka dhaxeeya sirta Faylsuufyada dadka iyo kuwa Kaneecada si wada jir ah u fahmeen. Haddaba waxaa haboon in sharaxaada looga nasto tusaalayaal ku aadan aragtiyooyin waa hore alleystay balse wali raqdoodii lagu dhex wad-wado dhaqanka sii dhutinaya ee dadka Soomaliyeed. Tusaale ahaan , dhaqan siyaasadeedka ka jira dalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah aragti dhimatay oo dhahaysa dadka Soomaaliyeed qabiil ha ku qaybsadaan hashii Maandeeq ahayd- Qaranimadii

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

gumaystaha laga dhaxlay. Qabiilka oo ah aragti ay hal-abuureen Soomaalidii hore ayaa ku saleysan malawaal runta nolosha aad uga fog. Haddii aragtida qabiilka la barbadhigo caddeymaha cilmiga ah " science" waxaa cadaanaya in qabiilku ku dhisnayn dhalasho iyo dhiig wadaag balse yahay magac loo sameeystay in lagu mideeyo dad waa hore dano deegaan ka dhaxeeyeen. Qabiilkii sidaas ahaa,hadda wuxu noqday walax la caabudo oo ka dhiga run biyo kama dhibcaan ah ah oo la damcay in lagu dhiso dawladnimo casri ah.

Sida uu faylasuuf Alfred North Whitehead sheegay, dadka waxaa u fiican in ay xabaalaan aragti kasta oo iskeed u saqiirta. Haddii dadku diidaan in aragtida saqiirtay xabaalaha taariikhda lagu aaso, waa in ay u diyaargarobaan dhimasho iyo dhagaxoobid ku dhaca dhaqanka markaas jira. Dhaqanka marka uu fadhiid noqdo oo dhiig cusub oo is badal ah la waayo, dadku waxay markale magan u noqondaan dhibaatooyinka deegaanka dabiiciga ah ku duugan. Saadashan falsafadaysan waxay si yaab leh uga muuqataa nolosha Soomaalida.

Markii Soomaalida si guud u diideen in ay ka tanaasulaan aragtida qabiilka in aysan ku shaqeyn karin dawladnimada casriga ah,natiijadii waxay noqotay in Soomaalida wali ku sugnaadaan nolosha harjadka ah ee waa hore aadanaha ka hormaray. Marka loo fiirsado dhaqan siyaasadeedka ka jira Soomaaliya, waxaad ku soo baxaya sawir ah aragtida qabiilka oo tarmaysa iyo dadkii Soomaaliyeed oo sii dabar go'aya! Ma is tiri Kaneecada ayaa mustaqbal dhaanta Soomaalida.

Sidoo kale waxaa jira aragtiyooyin duug ah oo rag daneystayaal ay diinta Islaamka ku darsadeen waa hore. Tusaale ahaan, rag aan xishoonayn ayaa hindisay aragti ah in diinta iyo siyaasadda ka dhigan yihiin mataano aan kala maarmi karin. Muddo badan oo lagu soo jiray dagaallo diimeed cuskan siyaasado raqiis ah, aadanaha si guud wuxuu ugu baraarugay in diinta iyo dawladnimada casriga ah ay ka dhiganyihiin sida nin iyo naag saddex dalaaq isku furay ka dib markii buuqooda maaro loo waayay. Dhaqamada marwalba aragti cusub lagu dhaqaajiyo waxay si dhibyar ku ogalaadeen kala saarida diinta iyo dawladnimada si loo helo nolol xasiloon oo dadka u saamaxaysa in tartiib u noolaadaan, waayo waxay fahmeen barakada ku duugan Falsafadda Kaneecada! Dhanka kale, dhaqamada wali dhuunta isku galiya diinta iyo dawladnimda, waxay ku jiraan buuq iyo

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

barakac aan dhamaad lahayn waayo waxay diideen in xabaalaha taariikhda ay geeyaan aragtidan dhimatay ee ah dawlad diimeed.

Falsafadda Kaneecada waxaa looga faa'idaysan karaa siyaabo kala duwan. Tusaale ahaan haddii qalanjo qurux badan oo dumarka aad ka xulatay kugu noqoto qumayo qaylo badan waa in aad ogolaata geerida aragtida qaldan ee qalbigaada jaceylka beenta ah ku beeray, haddii kale waxaad u diyaar garowdaa cimri dagdag iyo booqashada malakulmowt iska soo dhiga dhiig kar laga qaaday buuq iyo qaylo aan dhamaad lahayn. Dhanka kale haddii aad tahay gabar guursatay baarqab labo lafood ah balse muddo ka dib aad ku baraarugtay inuu yahay qawsaar aan qiimo badan lahayn, waa in aad aqbashaa dhimashada guurkaada, waayo caddeymaha cilmiga bulshada " soiciology" waxaa ka buuxa murugo iyo muraarad dilaac la soo darsa qoys uu aabe u yahay qawsaar aan qiimo badan lahayn!

Falsafadda Kaneecada waa falsafad fudud oo qof kasta iyo qolo walba ka faa'idasyan karto. Kaneecada waxay ogtahay in deegaanka dabiiciga ah " environment" looga baahanyahay kun ukumood si loo xaqiijiyo sii socoshada sinjiga Kaneecada. Sidoo kale deegaanka aan dabiiciga ahayn " culture" ee dadka u gaarka ah waxaa looga looga baahan yahay kun aragti oo cusub si loo ogaado aragtida saxda ah ee saamaxi karta sii socoshada nolosha aadanaha. Dadka Soomaaliyeed ee qarnigan 21aad ku dhiban nolosha caadiga ah waa in xabaalaha taariikhda geeyaan aragtiyooyin badan oo saqiiray oo wali raqdoodii lagu dhex wad-wado dhaqan siyaasadeedka iyo waliba dhaqan diimeedka ka jira dalka.

Waa in aqoonyahanka iyo waliba maskax shiilka ka soo baxaan kaalintooda ah curinta aragtiyooyin cusub oo is badal dhab ah ku keeni kara dhaqanka jira. Taas macnaheedu ma ahan in dib boorka looga jafo dhaqan jiri jiray oo laga tagey oo sheekadu naga noqoto sida heesta mama Nakruuma qaado ee ah " Dib baa loo noqonayaa… waa la noqonayaa! " Tusaale ahaan, maangal "logic" ma ahan in magaalo hadda ka hor ahaan jirtay caasimad sida Muqdisho oo kale in dib loogu noqdo ayadoo la rajeynayo in in markale caasimad noqoto!

Aqoonyahanka iyo waliba indheer garadka Soomaaliyeed waxaa looga fadhiyaa in ay fahmaan falsafadda Kaneecada oo ah in aragti kasta oo shaqeyn waysa laga gudbo. Tusaale ahaan, intii lagu isku murjin ama lagu mashquuli lahaa dib u soo celinta muuqaalkii caasimadeed ee Muqdisho, soo

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

kama haboona in degmo cusub loo caleemo saaro caasimad dadka Soomaaliyeed oo dhan u dhaxeysa. Waxaan hubaa in Jasiiradaha kala ah Juula iyo Jawaay ee ay daganyihiin dadka Soomaalinimada ay ku weyntahay ee loo yaqaan Baajuunta in ay noqon karaan degmooyin loo caleemo saari karo caasimaddii qaranka!

W/Q: Cabdulaahi M. Cawsey

Tixraac: Alfred North Whitehead (1967). Adventures of Ideas.
Simon and Schuster, -307 pages.

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.